

Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Waxyabihii Ku Soo Kordhey Daraasadda Culayska Shaqada Nadaafadda

Dayr/Jiilaal 2023


Wararka Hawlwadeennada Cilmi-baarista

- Mid ka mid ah hoggaamiyeasha mashruuceenna, Caroline Smith, ayaa ka tagtey daraasadda shaqaalaha nadaafadda ka shaqeeya waxayna hoggaaminaysaa [Xarunta Cilmi-baarista Sinnaanta Shaqada \(WERC\)](#) ee cusub ee halkan SHARP ee Waaxda Shaqada iyo Warshadaha. Xarunta WERC waxay hiigsaneysaa in bulshooyinka ay kala shaqeysa in ay wax ka abuuraan mashaariicda iyo in ay diyaariyaan xalal lagu sii wanaajinayo natijjooyinka shaqada la xiriira ee loogu talagalay shaqaalaha aan taariikh ahaan ama hadda waxba helin. Waad ku mahadsan tahay dhammaan shaqada adag ee aad qabatey, Caroline, waxaannu ku faraxsanahay in aan aragno waxa ay WERC qabato! [Naomi Anderson](#) ayaa hadda hoggaaminaysa Daraasadda Culayska Shaqada Nadaafadda.

Waxyabihii Ku Soo Kordhey Hawsha Cilmi-baarista

- Qalab xisaaba culayska shaqada ayaa la sameeyay wuxuunna ku guda jiraa marxalad tijaabineed – fadlan nala soo xiriir haddii aad tahay bahwadaag bulsho (loo-shaqeeye, xirfadle bedqab iyo caafimaad, ama wakiil shaqaale) oo jeelaan lahaa in uu tijaabiyo qalabka xisaabiyyaha iyo in uu inna siiyo jawaabcelin. Wuxaan ka shaqeynaynaa in aan qalabka xisaabiyyaha ah soo gelinno mareegta si adeegsigiisa uu u fududaado – laakiinse waa hannaan xoogaa waqtii ah qaadanaya. Wuxaan kula soo socodsiin doonaa horumarkeenna. Wuxaan sidoo kale filaynaa in aan xisaabiyyaha ballaarino iyadoo la sameynayo xog ururin goobta lagu sameeyo oo dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir haddii aad jeelaan lahayd in aad ku lug yeelato.
- Wuxaan si joogto ah dib-u-eegis ugu sameynaa xaqsheegashooyinka magdhowga shaqaalaha nadaafadda ka shaqeeya si aan u dooranno dhowr shaqaale oo laga qaadayo wareysiyo ku saabsan sida ay u dhaawacmeen, sidaa daraaddeed wuxaan wax ka oggaan karnaa khataraha shaqada iyo in aan si fiican u fahanno sida dhaawacyadan looga hortago. Laga soo bilaabo 1^{da} Luulyo, 2019, oo aan bilownay qaybtan daraasadda culayska shaqada nadaafadda, ilaa 30^{ka} Sibtembar, 2023 - ayaa waxaa jira 3,100 xaqsheegashooyin oo laga keenay shaqada adeegyada nadaafadda (sida lagu qeexay dabaqyada halisaha ee L&I¹). Wuxaan u mahadcelinaynaa qof walboor sheekadiisa nala wadaagay!

¹ Shaqaalahan waxaa ka mid ah kuwa ku jira Dabaqa Halista: Adeegyada Nadaafadda 6602-03, N.O.C.; iyo shaqaalaha nadaafadda 6602-05, N.O.C.



- Shaqaalaha nadaafadda ka shaqeeya ee xaqsheegashooyin soo gudbiyay intii lagu guda jiray muddada waqtiga waxay badankooda ahaayen (57%), waxayna da'doodu u dhaxeysoo 25-44 sano jir (45%) markay soo gudbiyeen xaqsheegashadooda.
- Marka la eego 906 xaqsheegashooyin oo ku filnaa in ay u gudbaan beddelka mushaarka, noocyada dhaawaca ugu badan waxay ahaayeen: xannuunada murqaha iyo lafaha ee shaqada-la-xiriira (26%), dhicid (22%), iyo 'kuwo kale'² (24%).
- Marka la eego 1,786 ee xaqsheegashooyinka caafimaadka-kaliya, noocyada dhaawaca ugu badan waxay ahaayeen: 'kale' (34%), ay ku dhaceen ama ay soo gaareen dhaawacyo (24%), iyo dhicitaanno (14%).
- Inta badan waxqabadyada guud ee aan ku aragno xaqsheegashooyinka waxaa ka mid ah: dhaawacyada ka dhasha qaadista ama meel kale geynta bacaha qashinka/daasadaha/weelasha qashinka; ku taraarixidda, ku kufidda iyo ka dhicidda – jarjanjarooyinka, dhulalka qooyan, alaabta guriga/qalabka; iyo shilalka baabuurta ee dhaca marka loo socdo/laga soo noqonaya goobaha shaqada.
- Inkastoo uusan ahayn mid ka mid ah dhaawacyada guud ee ugu badan, hal nooc oo dhaawac ah ee aan si joogto ah u aragno waa irbad mudidda – dhaawacyadan waxay badanaa dhacaan marka shaqaalaha nadaafadda ay gacanta ku qabanayaan qashin/bacaha qashinka.
 - Inta badan dhaawacyada irbad mudidda (68%) waxay saameeyaan farta.
 - Ka eeg xaashideenna talooyinka ugu dambeysa fikradaha ku saabsan sida la isaga ilaaliyo khataraha qarsoon.

² Noocyada dhaawaca waa qaybo ballaaran oo ay ku jiraan sumado gaar ah oo la isku kooxeeyay si loo falanqeeyo; 'kale' waxaa ka mid ah noocyada dhaawacyo badan ee aanan lagu sumadeyn meel kale; si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kooxeynta la adeegsaday, fadlan nala soo xiriir. Xaqsheegashooyinka ayaa la sumadeeyaa iyadoo la isticmaalayo sumadaha Kala-soocidda Jirooyinka iyo Dhaawacyada Shaqada (OIICS), v.1.01 (2007).

- Nasiibwanaag, inkasta oo ay noqon karaan dhaawacyo cabsi leh, haddana 102 xaqsheegashooyin ee ku lugta leh irbad mudidda inta muddadan lagu guda jiro, midkoodna ma keenin cudur isu-gudbin.
- Haddii uu shaqada kaa soo gaaro dhaawac irbad mudid ka dhashey – isla-markiiba raadso daryeel caafimaad una sheeg in shaqada uu ka dhacay; adiga iyo dhakhtarkaaga waxaad buuxin kartaan sheegashada magdhowga shaqaalaha; una sheeg loo-shaqeeyahaaga.



Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato daraasada,
wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP
360-819-7908 • 1-888-667-4277 • JanitorStudy@Lni.wa.gov
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-131-2023

